

Macluumaadka Muhiimka ah ee COVID-19

Department of Social and Health Services waxay ka hortagaysaa maamulaysaana COVID-19. Waxaanu aad u daneynaa badqabka iyo caafimaadka macaamiishayada. Waxaanu raacaynaa amarka iyo qorshaha kasoo kabashada *Badhasaaka Inslee* ee Joog Guriga, Ilaali Caafimaadka.

Waxaanu haynaa adeegyo luuqadeed oo bilaasha. Adeegyada waxa ku jira turjumaano iyo turjumid, iyo macluumaadka qaababka kale u qoran. Hadii aad caawimo uga baahan tahay helitaanka adeegyadayada, fadlan ka wac DSHS **800-737-0617** oo dooro khiyaarka 4. Waxaad sidoo kale wici kartaa **711** Adeegyadan Washington.

Sidee buu COVID-19 u saameeyey barnaamijyada iyo adeegyada DSHS?

Mudaynta iyo Taageerada Mudada Dheer

COVID-19 wuxuu halis daran ku noqon karaa dadka degan xarumaha mudada dheer. May 12, guryaha kalkaalintu, waxay caawiyeen ku noolaanshaha xaruma iyo guryaha qoysaska dadka waaweyn ah in aanay ogolaan booqdayaasha. Shuruucdu way isbadeli karaan inta lagu jiro xanuunka.

Waxaad ka eegi kartaa shuruucda booqdaha ee xarumaha daryeelka adoo booqanaya [FamHelp](#) wabsaayd. Boga wabsaaydkani wuxuu sidoo kale taxayaa xarumaha daryeelka ee leh kiisaska COVID-19 oo lasoo sheegay. Hadii aad wax su'aala ka qabto xarumaha daryeelka mudada dheer, fadlan wac 888-856-5691. Saacadahayagu waxay u dhexeeyaan 6 a.m. iyo 10 p.m.

Xafiiska Naafada Maqalka iyo Adeegyada Adkaanta Maqalka macaamiisha naafada ka ah maqalka, dhagaha la ama aan aad wax u maqlin. Waxay sidoo kale la shaqeeyaan adeeg bixiyayaasha. Hadii aad leedahay macmiil naafo ka ah maqalka oo u baahan caawimo wada xidhiidhka ah, fadlan la xidhiidh xafiiska.

- Iimayl: ODHHCovid-19@dshs.wa.gov
- Tilifoon: 360-338-6042
- Ta TTY/TDD: 360-725-3455
- Hadii aanay wacayaashu heli karin TTY/TDD, fadlan wac 711
- [Weybsaadka ODHH](#)

Behavioral Health Administration

Adeegyada Behavioral Health Administration dadka waaweyn iyo caruurto ee cisbitaalada dawlada ee daryeelka maskaxda, Xarunta Ka' Go' naasha Gaarka ah iyo Xafiiska Adeegyada Caafimaad Hidesidaha.

Waxaanu joojinay booqashooyinka goobahan si aan uga hortagno fiditaanka COVID-19. Waxaanu u haynaa adeegyada muqaalka durugsan macaamiisha markay haboonaato. Si aad u weydiisid shuruucda booqdaha ama su'aalaha kale, fadlan wac:

- Western State Hospital – **253-582-8900**

- Eastern State Hospital – **509-565-4000**
- Xarunta Daraaseynta iyo Daaweynta Caruurta – **800-283-8639**
- Xafiiska Adeegyada Caafimaadka Maskaxad
 - Khadka Mabal – **360-664-4641**
 - Yakima – **253-582-8900**
 - Fort Steilacoom – **253-984-5651**
- Xarunta Gaarka ah – **253-588-5281, ext. 0095**

Division of Vocational Rehabilitation

Waxaanu xidhnay xafiiska Division of Vocational Rehabilitation.

- Wakiilada ayaa ka bixin doona adeegyada iyo caawimada tilifoonka.
- Lambarka tilifoonka ee warbixinaha: **800-637-5627**

Developmental Disabilities Administration

Xafiisyadu way xidhan yihiin hada. Dugsiga Fircrest, Lakeland Village, Dugsiga Rainier iyo Yakima Valley ma ogolaanayaan booqdayaasha wakhti xaadirkan. Fadlan wac lambaradan hoose hadii aad su'aalo qabtid.

- Waxa suurto gal ah inaan ka bixino adeegyada meel fog ka dib ansixinta hore ee maamulaha kiiska DDA.
- Qiimeynta waxa laga qaban karaa meel durugsan wakhtiga lagu dhameystiro qiimeyntana waxa loo kordhin karaa xaalad xaalad.
- Adeegyada degmooyinka Island, King, San Juan, Skagit, Snohomish and Whatcom, wac: 800-314-3296.
- Adeegyada degmooyinka Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Kitsap, Lewis, Mason, Pacific, Pierce, Skamania, Thurston or Wahkiakum, wac: 800-248-0949
- Dhamaan degmooyinka kale ee gobolka, wac 800-462-0624

Economic Services Administration

TAAGEERADA CARUURTA: Division of Child Support way xidhan tahay hada. Si aad u heshid maclumaad ama u sameysid balan, wac **800-442-KIDS (5437)**. Shaqaaleysiiyayaasha u baahan in ay soo sheegaan shaqo ka joojin ama xidhitaano waxay wici karaan **800-562-0479**.

XAFIISYADA ADEEGYADA BULSHADA: Adeegyo xadidan ayaa diyaara **ku ah kaliya balan. Waxaad:**

- soo qaadani kartaa EBT kaadh hadii aad leedahay adeeg guud oo dalab ama hore loogu keeno cuntada.
- Soo qaadista adeegyada taageerada xaaladaha degdega ah.
- Warqada shaqada.

XARUNTA DARYEELKA MACMIILKA: hel adeega adoo wacaya **877-501-2233**. Waxaad awoodaa:

- Codso kabka.

- Hel macluumaadka kiiska ama soo sheeg isbadalada.
- Dhameystir dib u eegista ku haboonaashaha ama cadeynta.
- Codso kaadhka EBT.
- Hel shaqaale ama shaqaale bulsheed.

KHADKA WASHINGTON: Dadku waxay onlaayn ku heli karaan adeegyada oo Ingiriisi iyo Isbaanisha. Booqo WashingtonConnection.org si aad u codsatid kabka, dhameystirtid dib u eegista, usoo sheegtid isbadalada oo aad u heshid adeegyada maxaliga ah ee kale.

DADKA WAAWEYN, NAAFADA ARAGA AMA BARNAAMIJK A GUDBINTA NAAFADA/GURYEYNTA IYO BAAHIYA ASAASIGA AH: Waxaanu dib u dhignay dib u eegista naafada ABD hada. Waxaan sidoo kale badelnay shuruudca gudbinta HEN waxaananu joojinay ilaalino loo baahnaa. Fadlan wac **877-501-2233** macluumaad dheeriya oo ku sahabsan HEN iyo kiisaska ABD.

CUNTA ASAASIGA AH: DSHS waxay ku dartay kabka cuntada oo in badan loo ogol yahay qoyskiiba Maarij ilaa May 2020. DSHS waxay sidoo kale waydiin doontaa dawlada fadaraalka ah cuntada xaaladaha degdega ah bilkasta ee COVID-19.

- *Isticmaalka Cuntada Asaasiga ah:* Dhamaan barnaamijyada iyo adeegyada BFET waa diyaar. Shuraakada BFET waxay ka bixyaan adeegyada tilifoonka iyo onlaaynka.
- *Dadka waaweyn ee aan cidu ku tiirsaneyn:* Shuruudaha shaqada ee ABAWDs hada looma baahna. DSHS waxay wali u gudbinayaan dadka raba awoodana in ay ka qeybqaataan.

DIB U EEGISTA KABKA: DSHS dibu eegista la fidiyey ee ku haboonaashaha dhamaanaayey Abril, May ama Juun 2020 ee lixda bilood. Cadeymaha dib u eegista dhamaansay Abril, May ama Juun 2020 lama dhameystiraayo. Kabku wuu sii socon doonaa ilaa iyo inta qoyskaagu buuxinaayo dhamaan shuruudaha ku haboonaansha ee kale.

BARNAAMIJKA LACAGTA CAAWIMADA MASIIBADA: DCAP wuxuu diyaar u yahay qoysaska iyo dadka bilaa caruurta ah. Maaha inaad noqotid uun muwaadin. Dadku way ku haboon yihiin hadii ay buuxiyaan xadidaada dakhliga iyo khayraadka, kumana haboona barnaamijyada lacagta. Wac **877-501-2233** si aad wax badan u ogaatid.

XAFIISKA QAXOOTIGA IYO CAAWIMADA SOCDAAALKA: ORIA waxay leedahay barnaamijyo lagaga caawinaayo qaxootiga iyo muhaajiriinta:

- Shaqo raadinta iyo tababarada.
- Caawimada muhaajiriinta.
- Lasocoshada dhalinyarada.
- Caawimada qaxootiga dadka waaweyn, caruurta, ardeyda, iyo kuwa kale.
- Barnaamijyada caadiga ahi waxay ka furan yihiin onlaayn inta lagu jiro COVID-19. Xafiisku wuxuu leeyahay adeegyo cusub si uu kaaga caawiyo inaad codsatid shaqooyinka ama shaqo la'aanta, taageero

waxbarashaada, kana caawiyo kirada guryaha. Ku Haboonaashaha Caawimada Lacagta Qaxootiga iyo Daryeelka Caafimaad ee Qaxootiga waxa la kordhiyey ilaa Septeembar 30, 2020.

- Adeegyada iyo macluumaad dheeriya, wacl **360-890-0691**.

CAAWIMADA KU MEEL GAADHA AH EE QOYSASKA BAAHAN/DANYARTA AH: TANF 60-bil kordhin wakhti xadidan oo ay ku jiraan duruufta uu keenay COVID-19.

- Shuruudaha Danyarta waa la joojiyey hada. Macaamiishu waxay in ay sii wada karaan ka qaybqaadashada hadii ay awoodaan.
- Waanu joojinay cunoqabataynta Danyarta hada. Waxaan sidoo kale joojinay booqashooyinka shaqaalaha.
- Hadii aad tahay Shaqooyinka Bulshada ama ka qeybqaate shaqo-waxbarasho danyara, waad sii shaqeyn doontaa waxaanad heli doontaa xataa hadii aanad ka qeybqaadan karin COVID-19 awgii.